# CADCEED SOO BAXDAY

## CALAACALI MA QARISO

**qaybtii 3aad ee taxanihii ahaa run nin sheegaa godob waw halis**


w/q Cabdiraxmaan Faarax Guri Barwaaqo

hal_aqoon@yahoo.com

*"Su'aashaa haddii aniga la i wayddiiyo, waxaan dedaalkay odhan lahaa sidan:
Ina Cabdille Xasan sheekh waa ahaa, laakiin wadaadku kii aannu niqiin ma ahayan."*

*Boodhari Warsame*

### Hordhac




Bishii sagaalaad ee gu'gii aan soo dhaafnay waxa soo baxay buug la *yidhaa "Sooyaal: Ina Cabdalla Xasan ma Sheekh buu ahaa mise ...?"*. Buuggaasi oo, runtii, bulashada afsoomaaliga ku hadasha ka dhex aloosay dood xiisabadan bay dad badani siyaabo farabadan uga soo falceliyeen. Dadkaas waxa ka mid ah ninka la yidhaa Boodhari M. Warsame. Wuxuna soo qoray qoraal uu u bixiyey "*Taariikhdu waa Tolleey oo loo ma kala Tago"* (wardheernews dec.12dii 2012ka). Cabdalla Xaaji Cismaan baa isna soo dawiyey qoraal ladhkiisu ahaa "*Hub-siimo hal baa la siistay"* oo uu kaga falceliyey qoraalkii Ibraahin Yuusuf Axmed 'Hawd' ee magaciisu ahaa: *Daraa-wiishi yaa ay ahayd*?

Qoraal kale oo la yidhaa '*Nin walba qummanihiisa ayaa qoorta ugu jira*' buu Cali X. Cabdulle isna si dadban ugu soo darsaday doodda. Si kastaba ha ahaatee, waxan ku dadaali inaan qoraal kasta inta u baahan in la iftiimiyo aan ku ekaado.

### Si xun wax u sheeg sixiroole ka daran:

Aan ku bilaabee, Boodhari oo ku dadaalaya inuu dadka u fududeeyo waxyaalihii uu kula kulmay buugga magaciisu kor ku xusan yahay baa yidhi: *Buuggani waxa uu gaar ahaan diirad taban saarayaa Sayidka iyo halgankiisii.*

Yaab! Hadalkaa sida loo dhigay waa mid wax soofdaran habaabinaya. Haa, buuggu wuu ka hadlay Ina Cabdalla Xasan iyo Halgankiisiiba, hayeeshee, sida uu u dhigay qoraagu buuggu ugamuu hadal. Waxaanan u arkaa inuu yahay gef buugga lagaga been abuurayo iyo aflagaaddo lagu la kacayo garashada iyo garaadka dadka.

Si kastaba ha ahaatee, waxan rabaa inaan akhristayaasha u caddeeyo inuu buuggu yahay sida magaciisaba ka muuqata mid isu foodinaya wixii uu Ina Cabdalla Xasan sheegtay iyo falalkii iyo falaadyadii uu ku kacay intii uu halganka ku jirey, kuwaasi oo runtii sal u ahaa wixii ay mucaarku ku diiddanaayeen.

Sida laga wada warqabo, Ina Cabdalla Xasan kolkii uu Berbera yimid wuxu sheegtay inuu Sheekh yahay oo uu wato dariiqo cusub oo la yidhaa Saalixiya. Dad badan baana bilawgii raacay oo aragtidiisa taageeray. Sidaasi darteed, magaaladii wuu ku guursay oo wiilkiisii u horreeyey iyada ayuu ugu dhashay (Aw Jaamac Cumar Ciise, 1976). Hayeeshee, mar qudha ayaa laysku soo taagay. Waxana jirey wax dadkaa ku kelifey inay ka horyimaaddaan. Ha u badnaadeen falalkii iyo falaadxumadiisiiye. Falalkaasi iyo falaadximadii lagu diiddanaa waxa ka mid ahaa: cayda, dilka, dhaca, godadlanimada, laaluushka, diradiraha, laba canlaynta, iwm.[1] Si aad haddaba ugu dhiirrato inaad buugga akhrido oo aad indho dhexdhexaad ah ugu eegto bal aan dhawr tusaalo oo ka mid ah falalkii iyo dhaqanxumidii Ina Cabdalla Xasan lagu diiday aan halkan ku xusno:

## 1. Dhaca:

Diinta Islaamku ma oggola in dadka la dhaco. Sheekhna inuu arrintaa dadka ka waaniyo mooyee inuu dhiirrigeliyo ama isaguba ku kacaa waa midh subxaanale. Inuu ku kacay oo uu amray dagaalkii u horreeyey ee ay daraawiishi qaaddayna lagu soo boobay xoolo dad Soomaaliyeed lahaayeen waxa weriyey Aw Jaamac Cumar Ciise. Waxaanu yidhi:[2]

> *<u>Iyadoo laysku ogaa in Diinta kor loo qaado dalkana gaalo laga difaaco</u> ayaa colkaa la ambabixiyey. Nin sheekh ah oo la odhanjirey Shariif Cabdulle Shariif Cumar ayaa ilaalo u ahaa. Sayidkuna waa diray. Markii colkii dareeray culimadii diintuna hor socoto geelaana la soo dhacay ayuu nin arrintaas ka yaabay oo geeraar mariyey waxaanu yidhi :*
>
> *Col ashraafi wacaysiyo*
> *Caalin reero dhacaayiyo*
> *Cilmi geel lagu qaado*
> *Sayidkii calmanaayow*
> *Cimri yuu ku simaayoo*
> *Cidhibteeda ogaada !!!* "

[1] Intaas oo fal inuu falay caddayntooda waxad ka heleysaa SOOYAAL.

[2] *Aw Jaamac Cumar Ciise. Taariikhdii Daraawiishta iyo Sayid Maxamed Cabdulle Xasan,* 1976, bogga 28aad

## 2. Cayda:

Waa midda labaade, diinta Islaamka iyo dhaqanka Soomaalida midna ma oggola aflagaaddada (cayda) iyo in dumarka lagu masabbido gogoldhaaf. Si aan labadaa arrimood u caddayno, bal aan marka hore eegno wuxu quraanku ka qabo kolka haweeney lagu masabido gogoldhaaf. Waxaanay Aayadda afraad ee *Suurat Al-Nuur* odhanaysaa:

وَالَّذِينَ يَرْمُونَ الْمُحْصَنَاتِ ثُمَّ لَمْ يَأْتُوا بِأَرْبَعَةِ شُهَدَاءَ فَاجْلِدُوهُمْ ثَمَانِينَ جَلْدَةً
وَلَا تَقْبَلُوا لَهُمْ شَهَادَةً أَبَدًا ۚ وَأُولَٰئِكَ هُمُ الْفَاسِقُونَ ﴿٤﴾

> *Ujeeddada Aayadda oo af Somaliya:*
> *Kuwa (Zino) ku Gana (Sheega) Haweenka Dhawrsoon oon Afar Marag ah keenin Garaaca Siddeetan Garaacood, hana ka Aqbalina Marag Waligood, kuwaasina waa uun Faasiqiin.*

Haddii uu Eebbe midhkaa inna faray, Sheekh Maxamed Cabdalla Xasan ma oofiyey amar kaasi mise wuu hareer maray? Weydiintaa idinkaa ka warcelindoonee, bogga 95-96aad ee buugga waxa ku xusan gabaygan uu Ina Cabdalla Xasan u tiriyey Caasha Keenadiid ee uu ku yidhi:[3]

*Nimanyohow si daran buu qalbigu ii saddimayaaye*
*Sirqadii uu dhalay keenadiid sawdka laga keenay*
*Iyo silica ay tahay dhilladu waa si kala dheere*
*Saadada intay caayi iyo subacyadii diinta*
*Intay nimanka saalixiyada sare u keeneyso*
*Sibiisheeda ay kala wadhwadhi sacabka may saar to*
*Suyuceeda uri baa wadnuhu nala sureeraaye*
*Sunnaadheeda waa lagu bakhtiyi madax sanbiilleeye*
*Sanka waxa iga galay dooraday nagu sammuutaynne*
*Siilkeedu saaxaha ka weyn sina qabaalleeye*
*Waxay ugu saftaan sidii horweyn kaalin loo simaye*
*Soddon dowlis baa lagu shubaa saacad iyo leyle*
*Ilko suruqa bay leedihiyo foolal saawirahe*
*Sanbab weeye ceedhin afkii suuliga ahaaye*
*Sullankeed la naar waa waxay sabuhu dhuuqaane*
*Waxa saarta soomaalidii saaruqa ahayde*
*Sarkaalkiyo subeydaarradiyo sowjarkaa kuda e*
*Maxaan siil qadhmuun kala hadlaa waaba saaniyade*

[3] Yaasiin Cismaan Keenadiid, p.245

Akharistayaal u fiirsada, gaar ahaan dumarka Soomaaliyeed si weyn ha ugu dhugmo yeeshaan, waxa cay, dhaleecayn iyo aflagaaddo uu wadaadku gabadhaa walaasheen ah uu u mariyey!

Tuduca u dambeeya ee maansada, Ina Cabdalla Xasan wuxu ku masabiday Caasha Keenadiid inay ahayd '*Saaniyad*' isaga oo wax markhaatiya ama caddayna midna u hayn. Haddii aan Aayadda dib u dhuganno wuxu Eebbeheen innoogu sheegay in qofka ruux dumar ah ku eedeeya inay gogoldhaaf samaysay laga rabo inuu keeno afar markhaati. Haddii uu keeniwaayana isaga lagu dhufto 80 jeedal, laga oggolaan, ama laga dhigan, weligii, markhaati.

Wuxu haddaba buuggu akhristayaasha weydiin: haddii aan dad Muslina nahay midhkaa ma lagu kacay oo xukunkaa ma lagu riday Ina Cabdalla Xasan? Warcelintu waa maya. Waxase laga dhigay halyey, hoggaamiye, iyo SHEEKH!! Ninka Sheekh sheegtay ee ku kacay wixii Eebbe innaga reebay, qofka caleemo saaray waa isaga iyo garashadii iyo garaadkii.

Dhacdo kale oo taa la mid ah buu kula kacay  afo ka mid ah xaasaskiisii faraha badnaa. Sida la weriyey, Ina Cabdalla Xasan gogol dhaaf buu ku masabiday Dhiimo Ciise oo u dhaxday. Haddii uu Sheekh caalina ahaa waxay ahayd inuu ku dhaqmo sida ay aayadda Quraanka ah ee kor ku xusani tilmaamayso oo ah: Inuu afar markhaati keeno. Waxa haddaba isweydiin leh arrintaasu ma dhacday? Xaasha! Ina Cabdalla Xasan isagaa Dhiimo tuhmay. Isagaa markhaati isu noqday. Isagaa go'aanka keligii qaatay. Go'aankiisiina isagaa gacantiisa ku fuliyey. Sida laga yaabo inaanay dad badani ka warqabin, go'aanki wuxu noqday in Dhiimo la dilo. Waana la dilay (Ilaahay ha u naxariisto).

Arrinta yaabka lihi waa isaga oo aan intaa kaga hadhin Marxuumadda ee weliba u tiriyey maanso uu ku dhaleecaynayo. Maansadiina waa tan hoos ku xusan ee ku soo dhowaada (Yaasiin Cimaan Keenadiid:253):

*Inkastoo rasaas lagu ganoo lagu garaacaayo*
*Inkastoo ka goor iyo ka goor gamasyo loo haysto*
*Dhiimaa god loo qoday anaan laabta gelineyne*
*Haddaahay cadaawaha gardaran ugu garbaysaaye*
*Haddaahay gasiinkaan lahaa gunno u dhiibtaaye*
*Haddaahay nin geeskaa ka mari gaar u dhugataaye*
*Haddaahay sidii goodir dhalay godolka xiistaaye*
*Haddaahay garraarkow furfuri garaci Looyaane*[4]

[4] Sida uu Yaasiin C. Keenadiid ku sheegey buuggiisa Looyaan waa Looyaan Seed Magan. Wuxu la dhashay Carro Seed Magan oo ahayd Ina Cabdalla Xasan Hooyadii.  Waa yaabe, ninka uu Ina Cabdalla Xasan ku eedeeynayo inay Dhiimo garraarka (garayska) u furfuranaysaa waa abtigii rumaad oo hooyadii la dhashay!!

*Haddaahay ku guuxdaa wasmada gacaladeediiye*
*Haddaahay ku wada goohayaan gudo gariirtiiye*
*Haddaahay guskii kula jiraan goborta weynaaye*

In meyd la caayo ama wax laga sheego diintu way innaga reebtay. Waana wada ogtihiin. Waxay haddaba weydiintu tahay, ma halgankii iyo Ina Cabdalla Xasan buu buuggu diirad taban saaray, mise wuxu tilmaamay dhaqanxumadii, iyo anshax la'aantiisii? Waxan halkaa ku caddaynayaa inaanu Boodhari garanba wuxu buuggu ka hadlay.

Bal markanna aan eegno dhacdo taa la mid ah oo uu nin Soomaaliyeed kula kacay xaaskiisii iyo wixii laga yeelay. Bogga 92aad ee buugga waxa ku xusan in ninka la odhanjirey Cabdillaahi Muuse Cabdille Jiciir uu sidaasi oo kale uu maanso qadaf ah u tiriyey xaaskiisii oo uu ku yidhi:

*Caqligaa dabool laga geshaa duul hadduu lumiye*
*Durdurkuba hadduu dhagax dulmaro dihanka qoyn waaye*
*Meeshii daleelay biyuhu doog ka bixiyaane*
*Ruuxii damiinihi qalbiga waa ka daar xidhane*
*Dadku haddii wax loo sheego ways darajo-dhaamaaye*
*Alla dooriyeey hadalku waa kaaga darayaaye*
*Dundumooyinkoo lala hadlaa damac ma yeeshaane*
*Dawo malaha naagtii xun ee diidda waanada' e*
*Doqontii ku yeeshaa wuxuun lagu dabiibaaye*
*Anuunbaa nin doorka u dhashay aan duniba aafayne*
*Dar Ilaahay waxaan kaa nebcaa dadab-galkaagiiye*
*Rag bayse doonni buuxdaa baddaa kaga degaysaaye*
*Dabkayga iyo geelii ayaan dunina lay siine*
*Kugu daalay dhaaxa' e haddaan didibso kaa waayey*
*Darbo iyo dilliin iyo inaan dirisba kaa yeelo*
*Saddexdaa mid baan kula damcee adigu soo dooro*
*Naag yahay Dannood baa u weyn harada Doolloode*
*Duunyada haddii lagu horoo saalo lagu daadsho*

*I yaba waa dikhowdaa haddaan la isu diideyne*
*Darka Caynabay kugu masleen derisyadeenniiye*
*Dawgii la marayaa dhexduu deri ku yeeshaaye*

*Dermadaan la laabini dhakhsay duug u noqotaaye*

*Dikhsigaa ku dhaca xeedhadaan dabaqu saarrayne*

*Sida doogsin roob kaaga dhereg doobka reeruhuye*

*Dar kaloo haween lihi wax badan kaa dukaansada' e*

*Dirxilaha Madheedh waa cas yahay daawashada guude*

*Dawliilka baas waxad ku hodi duul an ku aqoonne*

*Geelaa markuu dararan yahay laba nin duugtaaye*

*Wax kaloo la darandoorriyaa damac ma yeeshaane*

*Anigoon ku dirin waadigii damaca waalnaaye*

*Daydayo haddaan kuu fasaxay debed wareegiiye.*

Buuggu isaga oo arrintaa sii faahfaahinaya buu odhanayaa:[5]

> *Ninkaasi, runtii, wax cay ah marwadiisii u lama hadhin. Marka dulucda guud la qaatana gogoldhaaf buu ooridiisii ku eedeeyey. Sida, haddaba, sheekada lagu wada hayo ninkaasu maansadaas muu mahadin. Waxana lagu xukumay inuu bixiyo magtii afada iyo isaga oo lagu cambaareeyey in uu ku kacay wax aan dhaqan loo lahayn, hor Ilaahayna aan ku wanaagsanayn. Sida la weriyeyna waxa sidaa loo yeelay baa la yidhi laba arrimooddartood:*
>
> *a) Afadii oo uu furay isaga oo aan wax markhaatiya u hayn, iyo*
> *b) Caydaa uu u geystey oo in ay cid dambeba xiloodiiso loo fadhiyin.*
>
> *Arrintu si kasta ha noqotee, caydiisu (ereyada uu adeegsaday baan ujeedaaye) maaha tu qaawan ood gabayga akhriskiisa kaga maagto ugana yakhyakhsooto sida kuwa uu tiriyey Sayid Maxamed Cabdalla Xasan.*

Siday doontaba ha ahaatee, in Ina Cabdalla Xasanna la shuumo, Cabdillaahi Muusana la shaaraa waa caddaalad darradii u weyneyd ee ka dhacda geyiga Soomaaliyeed. Buugguna labada nin midna waxba kama sheegin shakhsiyaddooda hayeeshee, wuxu wax ka sheegey dhaqan-xumidooda.

Qoruhu isaga oo markan iga been abuuraya ayuu igu eedeynayaa inaan Ina Cabdalla Xasan maxkamad saaray. Isaga oo arrintaa ka hadlayana wuxu yidhi:

> *"Haddii aan wax isku la haro oo si kale u iraahdo; qoruhu waxa uu buugga dhexdiisa maxkamad ku saarayaa Sayid Maxammad Cabdille Xasan iyo ciidankiisii. Waxa uu leeyahay xeerbeegtidii waa akhristeyaasha (haa, annaga!), qareennadii oogayay waa diyaar iyaga oo shisheeye iyo sokeeyaba leh, caddaymihiina waa dhoobanyihiin (af iyo addin wixii dhib Wadaadkaasi dad iyo dal u geystay)."*

[5] Sooyaal: Ina Cabdalla Xasan ma Sheekh buu ahaa mise…?, bogga 92-93aad

Beenaale markhaatigiisuu fogeeyaaye, akhriste, hoos ka eeg bogga 14aad ee buugga waxa ku qoran:

Ina Cabdalla Xasan

***AFEEF***

***Afeef hore lahaw ama adkaysi dambe lahaw ayey maahmaahdi ahayd. Haddaba Ina Cabdalla Xasan isaga ayaa Sheekh sheegtay ee anigu kuma sheegin. Wax kalana dadkii ka soo horjeedey baa ku tilmaamay ee anigu kuma sheegin. Sidaasi awgeed, waxan isu foodinayaa falkii iyo falaadkiisii si loo kala ogaado waxa uu ahaa.***

14

Haddaba, si xun wax u sheeg sixiroole ka darane, Ina Cabdalla Xasan ma maxkamad baa la saaray mise waxa la tilmaamay in lays barbar dhigidoono wixii uu sheegtay iyo wixii ay ku arkeen dadkii ka soo horjeedey?

Waxa kale oo aan tilmaamay in Sheekh lagu yiqiin, haddana lagu yaqaan, anshax iyo asaw wanaag si uu dadka ugu noqdo tusaale fiican. Waxa haddaba isweydiin leh, Ina Cabdalla Xasan tayadaa iyo tilmaamahaasi ma muujiyey mise wuu ka hor yimid?

## Marag furkii Boodhari

Boodhari Warsame muu qarsan, si badheedha buuna innoogu sheegay waxa uu Ina Cabdalla Xasan ahaa. Isaga oo arrintaa caddaynayana wuxu yidhi:

> *Su'aashaa haddii aniga la i wayddiiyo, waxaan dedaalkay odhan lahaa sidan: Ina Cabdille Xasan sheekh waa ahaa, laakiin wadaadku kii aannu niqiin ma ahayn.*

Sida buugga ladhkiisu tilmaamayo, akhristayaasha ayaa laga rabaa inay gaadhaan go'aanka wixii uu Ina Cabdalla Xasan ahaa. Waxa loo jeedaa inuu Sheekh ahaa ama uu wax kale ahaa. Sidaasi awgeed, qoruhu, si cad oo aan madmadaw lahayn buu innoogu caddeeyey aragtidiisa ku aaddan wixii uu Ina Cabdalla Xasan ahaa. Waa qorihii u horreeyey ee qira inaanu Ina Cabdalla Xasan la mid ahayn sheekhyadii aynu niqiin ee dadka farijirey wanaagga, ugana digijirey xumaha sida: xanta, aflagaaddada, dilka, dhaca, iwm. Waxana hubaal ah in qof kasta oo hadalkaa akhriyey uu is weydiinayo: haddii aanu ahayn sheekhii aan niqiin, muxuu ahaa? Si kastaba ha ahaatee, Sheekhu inuu dagaallamo oo diintiisa ilaashado layskuma hayo ee waxa lays weydiinayaa ma inuu anshaxa iyo asawda ka arradnaadaabaa?!

## Jiritaanka warqadda iyo xogaha cusub ee soo kordhay

Qoruhu wuxu inoo soo tebiyey sheekadii Maxamed Nuur oo uu u adeegsaday inuu ku caddeeyo jiritaanka warqaddii Sheekh Maxamed Saalax u soo diray Ina Cabdalla Xasan. Isaga oo arrintaa sheegayana wuxu yidhi:[6]

> *Ilaa hadda waxaa xaqiiqo ah in warqadi jirtay iyo in isbahaysi Talyaanni-Ingiriis-Somali ahi uu jiray,…*

Hayeeshee qaybtan kale ee hadalkiisa wuxu meesha ka saarayaa oo uu qoraalkiisa ku beeninayaa aragtidii Aw Jaamac Cumar Ciise innoogu sheegey buuggiisa ee ahayd in Maka loo diray saddex sheekh oo kala ah Sheekh Cali-Neyroobi, Sheekh Ismaaciil Sheekh Isaxaaq iyo Sheekh Madar. Isaga oo arrintaa sheegayana wuxu yidhi:

> *…laakiin meesha ay [warqaddu]ka timid Cadan ka hor, ciddii Shixiri ergadeeda ku wehelisay, hindiisaheedii hore ciddii lahayd (marka gumeystayaashii laga reebo) iyo qoraalkeedii asalka Carabiga ahaa midna caddayn sugan looma hayo (inta ilaa hadda qorahani[7] ka warqabo).*

Si kastaba ha ahaatee, waxa xusid mudan inaanan anigu diidin jirtitaanka warqaddaasi. Hayeeshee, waxan diiday ahayd habka uu Aw Jaamac Cumar Ciise innoogu soo bandhigay oo ah sidan hoos ku qoran, ee ahayd:[8]

> ***Aw Jaamac Cumar Ciise** waxa uu qoray in markii Heshiiskii Ilig ee saddex geesoodka ahaa la galay (1905) oo xoogaa la kala nastay uu gumaysigu dhagar maleegay si Daraawiish qas iyo qalaanqal looga dhex tuuro iyada oo xagga diinta laga marayo. <u>Waxa kale oo uu qoruhu xusay in ergo Cabdalla Shixiri ku jiro ay Maka u dhoofeen iyaga oo Ingiriis gacan ka helay si ay dacwo gurracan Sayidka</u>*

[6] WARQADDII MAKA : Falanqayn, wardheernews.com, Diis. 27, 2012

[7] Qoruhu waa Boodhari Warsame

[8] Eeg qoraalka "warqaddii Maka: falanqayn", wardheernews.com. Diis. 27, 2012

*uga geeyaan sheekhiisii Maka joogay ee Maxammad Saalix ahaa. Intaa waxa dheer in sheekhu aanu ku qancin warkoodii oo ay muddo ku qaadatay in ay wax uun ka dhaadhiciyaan. Waxa uu ku daray in uu markii dambe warqad wanaagsan oo waano ah yeedhshay, dabadeedna karraanigii sheekha la musuqmaasuqay oo uu warqad canaan ah oo tii ka duwan qoray, sidaana ay Cadan ku soo gaadhay oo dabadeed sayidka xaruntiisii loogu geeyay.*

Isku soo wada xooriyoo waxa qoraalkii qorahaasi innooga kordhay xog cusub oo aan hore loo aqoon ama loo been abuuray. Waxana xogahaa ka mid ah:

1. In warqaddu jirtey, hayeeshee, aanay jirin, sidii uu Aw Jaamac buuggiisa innoogu sheegay, ergo Ina Shixiri u raacday Maka
2. In Sheekh Ismaaciil Berbera ka tegey oo uu warqadda Cadan ka raacay.
3. Inaanay jirin sheekadii Aw Jaamac ee odhanaysey Maka ayaa loo diray Sheekh Ismaaciil, Sheekh Cali-neyroobi iyo Sheekh Madar, iyo
4. Inaan wax caddayna loo hayn aragtida Aw Jaamac ee sheegeysa in karraanigii sheekha la musuqmaasuqay.

Hadal iyo dhammaantii, in kasta oo uu qoraagu sheegay inaanu buuggu waxba soo kordhin waxa cad inuu durba xogaha kor ku xusan oo dhan oo hore dadka uga qarsoonaa uu dibadda soo dhigay. Waxa kale oo uu soo kordhiyey inaad u markhaati furtay raggii Ina Cabdalla Xasan ka soo horjeeday oo kolkii ay garanwaaayeen sheekhnimadiisii ku tilmaamay inuu Shaydaan ahaa. Tusaale ahaan *Cilmi Carab Cabdi* oo ka yaabay Sheekhnimada Ina Cabdalla Xasan buu ahaa ninkii yidhi:

*Abeesaduba dhul u-ekiday kugu idlaysaaye*
*Oogada sareetiyo dubkuu nooga eeg yahaye*
*Aadanaha wuu shaabahaa waanuse ahayne*
*Islaan baa khalqigu moodayaa waa ibliis kanuye*
*Insi maaha shaydaanku waa ruuxaan la aqoone*
*Asxaabtii fircoon buu ka hadhay odayadoodiiye*
*Ashahaado goortuu qiree uu addimay waayo*
*Awliyo la mood shawse waa ehel cadaabeede*

Cali Jaamac Haabiil oo isna caan ku ah hal adaygiisa iyo halkii uu ka taagnaa sheekhnimada Ina Xasan baa isna yidhi:

*ALLAHAYOW IBLIISKAAS KHALQIGU KA ASHTAKOONAAYO*

Intaa haddii aan qoraalladii Boodhari ku dhaafo, waxan wax yar ka odhan qoraal magaciisu ahaa "*Nin walba qummanihiisa ayaa qoorta ugu jira*" oo uu qoray Cali X. Cabdulle, kuna soo baxay degelka wardheernews, Diis. 13, 2012. Qoruhu isaga oo ka yaabban aflagaaddada loo aanaynayo Ina Cabdalla Xasan buu yidhi:

*Anigu marka aan is barbar dhigo gabaydaa foosha xun ee loo nisbeeyo Sayidka, iyo dhaqankiisa Diimeed, labadaasi isuma kay qabtaan oo inta badan shaki weyn baa iga gala jiritaanka gabayadaa isaga lagu hafro. Sida aynu ognahay, Axaadiista Nebiga ( SCW) waxa loo kala saaraa afar qaybood:*

1. *Mid Sax ah oo la hubo in uu Nebigu yidhi*
2. *Mid Xasan ah oo aan gaadhsiisnayn darjada koobaad*
3. *Mid Diciif ah oo laga shakisan yahay*
4. *Mid Mawduuc ah oo laga been abuuray Nebiga*

Runtii waa arrin yaabkeeda leh in gabood falkii Ina Cabdalla Xasan loo adeegsado Diinta iyo Axaadiistii Nebiga. Mana ah markii u horreysey ee Ina Cabdalla Xasan Nebiga lala doontay ee la yidhi dhawr meelood buu Nebiga ka shaabbahaa. Arrinta, haddaba, meesha taalla ee la iftiiminayaana waa dhaqankiisii iyo aqoontiisii Diineed!! Ilaa hadda lama hayo buugaag diiniya oo uu qoray Ina Cabdalla Xasan oo aan ka dheehan karro meeqaamka diineed ee lagu sheegayo. Hayeeshee, waxan haynaa maansooyinkii uu curiyey oo aan ka dheehan karro dhaqanxumo iyo dhaqan wanaag midkii uu lahaa. Mana la yaabayo haddii ay qoraha isu qaban waayeen gabayada cayda ah iyo Sheekhnimada Ina Cabdalla Xasan. Waayo wuxu qoruhu moodayaa inuu Ina Cabdalla Xasan ahaa, ama la mid ahaa, sheekhyadii aynu niqiin. Waxanan u malayn inaanu qorahan dambe akhriyin ama ilduufay qoraalkii Boodhari Warsame, kaasi oo uu innoogu caddeeyey inaanu wadaadku la mid ahayn wadaaddadii aynu niqiin!

Arrinku siduu doonaba ha noqdee, Yaasiin Cismaan Keenadiid baa buuggiisa la yidhaa "***Ina Cabdille Xasan ela sue attivita lettetaria, bogga* 245aad"** ku qoray maansada uu Ina Cabdalla Xasan u tiriyey Caasha Keenadiid. Hadda u fiirso oo Caasha Keenadiid waxay eddo u ahayd Yaasiin. Waxan ujeedaa waxay la dhalatay oo ay walaashiis ahayd Boqor Cismaan Keenadiid. Yaa uga dhow oo sheegi lahaa gabaygaa? Ma waxad leedahay gabaygaa uu Yaasiin soo tebiyey baa daciifa? Haddii uu haddaba kaasi daciif yahay ma kuwa uu Aw Jaamac Cumar Ciise soo tebiyey baa saxeexa?

Qodobka kale ee u baahan in la xusaa waa iyada oo uu Aw Jaamac maansadii Ina Cabdalla Xasan ka dhigay wax uu isagu iska leeyahay oo uu kolba sida uu doono uu u qoro. Mahadho ama sooyaal, qofba sida uu u yaqaan, waa wax hore u dhacay oo xasuus lagu hayo ama lagu diiwaan geliyo. Qofna keligii kuma doodi karo inuu isagu iska leeyahay sida uu doonana u qorikaro. Sidaasi awgeed haddii taariikhda Ina Cabdalla Xasan innaga dhexayso maxaa kolba sidii la rabo loogu qorayaa? Tusaale ahaan, gabayga caanka ah ee uu Ina Cabdalla Xasan u soo mariyey Cali Jaamac Haabiil, reero badan buu ku af lagaaddeeyey. Arrinta hadda laga hadlayaana maaha muxuu u aflagaaddeeyey reerahaasi, hayeeshee, arrintu waa maxaa tuducyadii gabayga ku jirey qaarna loo qorayaa qaarna looga tegeyaa, kolkii la doonana kolba ujeeddadii la rabo loogu sheegayaa sidan hoos ku cad?

Tuduca uu Ina Cabdalla Xasan reerka Samaroon wax kaga sheegey buugga laguma qorin. Tuducaasi wuxu odhanayaa sidan

***Hilib(hilbo) uraya Gadabuursigii huursan jirey baa leh*** **(Barwaaqo:165)**

Waxa isna xusay inay sidaasi jirto Kayse Jaamac. Waxanu inoo sheegey in gabayga oo maqal ihi uu ku jiro degelkan hoos ku xusan. Waxana gabayga tirinaya sida aan ka dhegeystey Aw Daahir Afqarshe, gabaygana ka dhegeysta degelka ay sumaddiisu tahay: *www.doollo.com qeybta maqalka.* Ninka taa ku kacay inuu Ciise ku sheego Ciise Muuse wax ka joojinayaa ma jiro. Si kastaba ha ahaatee,

## Ciise waa Ciise-madoobe:

Qoraalkii Ibraahin Yuusuf Axmed 'Hawd' ee ladhkiisu ahaa "*Daraawiishi yaa ay ahayd ?* " (http://www.wardheernews.com) baa isna dood xiisabadan akhristayaasha ka dhex oogay. Taasi oo keentay inay dad badani ila soo xidhiidhaan igana soo warsadaan arrinta ku saabsan Ciisaha uu Aw Jaamac Cumar ku sheegay inuu yahay reerka Ciise Muuse sida ku xusan daabacaaddii 3aad ee buugga la yidhaa "*Diiwaanka gabayadii Sayid Maxamed Cabdalla Xasan*".

Si arrintaasi muranka iyo madmadawga looga saaro, waxa mudan in la xuso inuu jiro hab ka mid ah habdhaqanka Soomaalida, oo aan qornayn, oo lagu kala saaro dadka ama reeraha isku magaca ah. Waxana hubaal ah inuu Ina Cabdalla Xasan habkaa yiqiin oo uu adeegsan jirey kolka uu maansooyin curinayo. Habdhaqankaasi maaha mid sidii la doono loo micnayn karo. Sidaasi awgeedna, Ina Cabdalla Xasan, marka uu gabay tirinayo, wuu yiqiin cidda uu u jeedo, waxanu adeegsan jirey habkaa aan soo sheegay, taana waxa kaaga marag kacaya arrimahan soo socda:

a. Waxa jira saddex reer oo ka tirsan beesha Habar Yoonis, Isaaq, oo la kala yidhaa:

*Muusa Cabdalle,*
*Muusa Ismaaciil iyo*
*Muusa Carro.*

Markii uu, haddaba, Ina Cabdalla Xasan gabaygiisaa tirinayey wuu kala caddeeyey si aan ujeed -dadiisa loogu murmin ama aanu muran u gelin cidda uu ka hadlayo. Isaga oo habkaa aan soo sheegay adeegsanaya wuxu yidhi:

*Harag uraya **Muusa Carrahii** hoodhin jirey baa leh*

Waxa halkaa innooga cad inaanu ujeedin labada Muuse ee kale.

b. Jiritaanka habkaasi kor ku xusan waxa kale oo aan u adeegsan maansadan uu Ina Cabdalla Xasan tiriyey ee odhanaysa:[9]

*Axmad Nuuxa nirig haaruf badan, kabadh u heeryeeyey*
*Ee hilinka meeshiyo Hiraab, habaqluhuu qaaday*
*Iyana heer inay leeyihiin, hubantiday weeye*

[9] Waxan ka soo dheegtay qoraalka la yidhaa "Hubsiimo hal baa la siistay" wardheernews.com

*Muusa Carraha haragga iyo, hoodhka xidhanaaya*
*Ee qudhunka ay huursadeen, lagu hunqaacaayo*
*Iyana heer inay leeyihiin, hubantiday weeye*

*Ciisaha bakhtiga hiigayee, haadka qalanaaya*
*Ee calaha habuurka badan, hagida meeraaya*
*Iyana heer inay leeyihiin, hubantiday weeye*

*Habar Yoonis iyo reer Jugliyo, Habar Magaadloo dhan*
*Iyo Caliga hoosada Berbera huluqa jiidaaya*
*Iyana heer inay leeyihiin, hubantiday weeye.*

Haddii aan gabaygaa tuduc tuduc u eegno waxad arkaysaa inay isaga iyo kii aynu ka hadlayney isku ujeeddo yihiin, qaabkii aan soo sheegnay ee ahaa inuu Ina Cabdalla Xasan yaqaannay cidda uu ka halayana uu kanna ku adeegsaday. Waxba yaanan ku sii dheeraanne, waxa maansada innoogu cad dhawrkan arrimood ee soo socda:

1. Axmed Nuux waa Habar Awal. Waxa jira reer kale oo la yidhaa Axmed Cabdalle oo isna Habar Awal ah. Waxa kale oo jira reer kale oo la yidhaa Axmed Faarax oo ka tirsan Habar Jeclo. Si aan saddexdaa laysugu murgin, wuxu Ina Cabdalla Xasan sheegey magacii reerka uu ujeedo oo dhan.
2. Sidaan kor ku xusay, si aan laysugu murgin saddexdii Muuse buu halkanna ku caddeeyey reerka uu u jeedaa inuu yahay Muuse Carre. Midhka kale ee markhaatiga ihi waa isaga oo isla wixii uu maansadii hore ku caayey oo ah harag uraya, uu tanna ku caayey harag iyo hoodhintii.
3. Ciise-madoobe markii hore wuxu ku caayey bakhti uu hiigayey, kanna intii uun buu ku celiyey.
4. Sidaasi awgeed, waxa cad inuu Ina Cabdalla Xasan ahaa qof garanaya hab dhiska bulshada Soomaaliyeed, kolka uu wax tirinayana uu yiqiin waxa uu ka hadlayo. Mana filayo in loo baahnaa in la qeexo ciddii uu ula jeedey Ciise, waayo ujeeddadiisu sidaasi ayey u caddayd dadka Soomaaliduna meel kasta oo ay joogaabba ugu yaqaanaan in Ciisaha la sheegayaa uu yahay Ciise-madoobe ee aanu u ahayn Ciise Muuse.
5. Markii uu Ina Cabdalla Xasan af lagaaddeynayey Cali Jaamac Haabiil wuxu yidhi:

   *Huuraale Cali Jaamac iyo huluq dameer baa leh*

   Wuu caddeeyey in ninka uu ka hadlayaa yahay Cali Jaamac Haabiil ee aanu cid kale u jeedin. Maansadanna bal u fiirso sida uu u dhigay ee ah:

   *Iyo Caliga hoosada Berbera huluqa jiidaaya*

Tolow yuu imminkana u jeedaa? Warcelitu waa Caligii uun. Maxaa marag ah een ku caddayn karnaa in Caligan uu Ina Cabdalla Xasan sheegayaa yahay Cali Jaamac Haabiil? Waxan ku caddaynayaa, bal u fiirso, magaca Cali wuxu raaciyey qodobka ah (-ga ) oo tilmaamaya inuu yahay mid la garanayo. Weliba wuxu ku sii daray deegaankii uu u dhashay. Waxa kale oo innoo

caddaynaya Caliganna wuxu ku caayayaa Huluq, markii horana isla ceebtaasi buu ku sheegay Cali Jaamac Haabiil. Sidaasi darteed Ciisaha uu Ina Cabdalla Xasan ka hadlay waa Ciise-madoobe.

c. Sidii aan hore u tilmaamay, Ina Cabdalla Xasan wuu yiqiin inay jiraan Ciise, Ciise Muuse, Ciise Maxamuud, Ciise Garxajis, iwm. Isaga oo, haddaba, raacaya qaabkii hore ee ahaa inaan laysku murgin ama muran u gelin cidda uu u jeedo ayuu u yidhi:

*Ciisaha bakhtiga hiigayiyo haqay Midgaan baa leh*

Hadal iyo dhammaantii, markaan waxaas oo caddayna isu geyno waxan si cad u sheegayaa in Ciisaha uu Ina Cabdalla Xasan u jeeday uu yahay Ciise-madoobe ee aanu marna ahayn kuu Aw Jaamac sheegey.

Mar aan ka hadlayey hababkii uu Ina Cabdalla Xasan u adeegsan jirey cabbudhinta ayaan bogga 112aad ee buugga Sooyaal: Ina Cabdalla Xasan ma Sheekh buu ahaa Mise…? ugu qoray sidan:

*Hanjabaadda iyo cagajugleynta uu dadka ku hayey may yarayn. Sidaasi awgeed, waxa la wariyey in intii uu Ina cabdalla Xasan ku sugnaa Berbera uu ka warqabay inuu jirey ciidan xooggan oo fardooley ah oo uu Cali Jaamac Haabiil horjooge ka ahaa. Isaga oo u maatmaatinaya ayuu maansada intan hoos ku qoran laga hayo ugu soo hanjabey. Waxaanu yidhi:*


*Ciise Muuse Laaleys qaxwaha ha iska laasima e*
*Lebi-raqaso reerihi dul yiil laydhku ii qabaye*
*Leexada fardaa reer wacays libin ha moodeene*
*Nin laxaad ku faanaba anaa liidaro utegiye*
*Laayaanka xeebaha Berbera laaxinbow baxaye*

Weydiinta halkan innooga soo baxday baa ah: Muxuu halkan u yidhi Ciise Muuse ee uu odhan waayey Ciise sidii kuwii hore?

Habkii aan soo tilmaamay maaha mid ay hal-abuurrada oo qudhihi adeegsan jireen ee waa mid loo sinnaa oo ay dadka kalana si joogto ah u adeegsanjireen haddana u adeegsadaan. Tusaale ahaan, marka qof la sheegayo haybtiisa guud waxa la yidhaa: Hebel waa Daarood, Isaaq, Samaroon, Ogadeen, Ciise, Sacad, Habar gidir, Majeerteen iwm. Hayeeshee, kolka hoos loo dego ee la rabo in la kala saaro magaca guud ee reerka iyo magaca qof ama jilib hoosaad, waa la tilmaamaa oo magaca aabbaha ayaa la raaciyaa ka jilibka ama ka qofka. Tusaale ahaan, haddii lagu barayo laba nin oo midna Ciise yahay midna Ciise Muuse, waxa ninka Ciise lagu odhanayaa ninkanu waa Ciise. Ka kalana waxa lagu odhanayaa waa Ciise Muuse. Weligaa maqlimeysid in lagu yidhaa ninkani waa Ciise-madoobe. Sidaasi awgeed Ciisaha uu Ina Cabdalla Xasan ka hadlay *Ciise Muuse maaha ee waa Ciise-madoobe.*

Arrinta kale ee xusidda mudani waxay tahay in maantadan an joogno kolka la sheegayo haybta reeraha Soomaaliyeed ee Jabbuuti deggan laguugu kala sheegayo Ciise, Samaroon iyo Isaaq. Ma jirto cid tidhaa, “Jabbuuti waxa dega Ciise Madoobe, Samaroon Siciid iyo Isaaq Bin Axmed.”

Aan sii wadno caddayntiiye, Soomaaliyi horay u tidhi, “Meyd maxaa u dambeeyey?” Markaasaa la yidhi, “Kaa la sii sido.” Waxan uga socdaa, inaan marka la sheegayo Ciise iyo Ciise Muuse marna laysku murgin ee habkii aan soo sheegay la adeegsado waxa laga heleyaa wargeysyada iyo qoraallada internet-ka ku soo baxa. Tusaale ahaan, sidaad la wada socotaan waxa dhowaan Soomaalilaand ka qabsoomay doorashooyin aan sidii la rabay u dhicin, degmo kasta iyo gobolkastabana laysku haystey. Sidaasi darteed, warbaahintu kolkii ay baahinaysey dhibaatadii ka taagneyn gobolka Saaxil waxay si toosa u werinaysey cabashada reerka Ciise Muuse. Hayeeshee, kolkii ay warbaahintu baahineysey cabashadii iyo ergooyinkii ka socdey gobolka Salal waxa loo sheegayey sidii aan hore u sheegay ee ahayd in beesha Ciise ka cabanayso boob lagu sameeyey codbixintii. Bal adba nala eeg warkan ku soo baxay degelka hadhwanaagnews oo si dhab ah u werinaya qodobbadii ay soo saareen golaha dhaqanka beesha Ciise.


Sunday, January 6, 2013

**Golaha Dhaqanka Ee Beesha Ciise Oo Qodobo Ka Soo Saaray Khilaafka Saylac Iyo Lughaya, Waxaanay ka Digeen Khatar Ka Iman Karta Muranka OO Daba-dheeraada** Golahan dhaqanka ee beesha Ciise waxa ay shirkaas ku sheegeen inaanay doorashadii Golaha deegaanka ee Somaliland ka qabsoontay bishii November ee Sanadkii tagay aanay aqoonsanayn, isla markaana waxa ay ku baaqeen in Madaxweynaha Somaliland

Sunday, January 6, 2013

Waydiinta haddaba meesha ku jirtaa waxay tahayCiisaha ay Hadhwanaag u jeeddaa ma Ciise Muusaa mise waa Ciise-madoobe?

Degelka kale ee la yidhaa Oodweyne baa isna qoray war ku saabsan gobolka Salal, waxaanu yidhi:




Beesha Ciise Oo Qaadacday Meel Adagna Iska Taagtay Doorashadii Maayarada Saylac Iyo Lughaya

**Diridhaba (OWN)- Shir balaadhan oo Beesha Ciise ku yeelatay Guriga Ugaaska ee Diridhaba oo uu gudoomineyay Ugaaska beesha Ciise kana qaybgaleen Golaha guurtiga iyo qaybaha kala duwan ee Beesha Ciise, ayaa laga soo saaray qodobo lagu dadafeeyey doorashadii hogaanka golayaasha deegaanka cusub ee Saylac iyo Lughaya.**

Dhanka kale, haddii aad google-ka ku qorto magaca Ciise Muuse waxa kuu soo baxaysa sida ay magacaa warbaahintu u adeegsato sida ku cad sawirka soo socda oo ah in beeshaasi magaceeda la dhammeeyo si aan beesha kale ee Ciise loogu qaldin.



Cuqaasha beesha **Ciise Muuse** Burco oo eedo iyo dhaliilo kulul ...
www.qarannews.com/index.php?option=com_content...id...
18 Jul 2012 – Hargysa,(Qaran news)-Shir jaraa'id oo maanta ay ku qabteen Hotel Cigaal Burco cuqaasha iyo madax dhaqmeedka Beesha **Ciise Muuse** ...

Guddida Beesha **Ciise Muuse** ee Dan iyo Duco iyo koox Wasiiradda ...
www.hargeisatribune.com/guddida-beesha-**ciise-muuse**-ee-dan-iyo-d...
Guddida Beesha **Ciise Muuse** Ee Dan Iyo Duco Iyo Koox Wasiiradda Xukuumadda Ah Oo Dhagax Dhigay Laba Dugsi Oo Ku Kacaya Hal Milyan Oo Doolar ...

**Gabagabo:**

Guntii iyo gabagabadii, qoraalkan gooban waxaan wax kaga taataabtay qoraallo kala geddiisan oo si kala duwan, si toosa iyo si dadbanba, loogaga soo falceliyey qaar ka mid ah aragtiyihii ku

soo baxay buugga la yidhaa “*Sooyaal: Ina Cabdalla Xasan Ma Sheekh Buu ahaa Mise…?*” waxan sheegay sidii uu Boodhari Warsame isugu deyey inuu u foofdaran habaabiyo aragtii buugga. Waxanan ku dadaalay inaan caddeeyo inaanu buuggu diirad taban saarin shakhsiyadda Ina Cabdalla Xasan iyo halgankiisii toona ee uu si toosa uga hadlay dhaqanxumadii iyo falalkiisii kala duwanaa. Waxa kale oo aan qoraalkii Boodhari ka ogaanay inaanu Ina Cabdalla Xasan ahayn ama la mid ahayn sheekhyadii aynu niqiin. Waxa kale oo uu qoruhu beeniyey wacaal badan oo ku qornayd buugaagtii Aw Jaamac Cumar Ciise inoo qoray. Waxa kale oo aan iyana wax ka idhi in Ciisaha uu Ina Cabdalla Xasan sheegay ahayn Ciise Muuse sida uu ku dooday Aw Jaamac Cumar Ciise, aniga oo soo taxay caddaymo badan oo arrintaa taageeraya. Waxa kale oo aan tilmaamay in maansada uu Ina Cabdalla Xasan ku aflagaadeeyey Caasha Keenadiid ay tahay mid uu soo weriyey Yaasiin Cismaan Keenadiid, sidaasi darteedna ay marag u tahay dhaqan xumadii Ina Cabdalla Xasan, taasi oo iyana marag u ah inaanu meeqaamka diineed ee Ina Cabdalla Xasan ahayn mid sidaa u sarreeye sida uu u haysto Cali X. Cabdulle. Waxanan hadalkayga ku soo gunaanadayaa oo aan leeyahay **cadceed soo baxday calaacali ma qariso.**